

u caafimaaday. Daawada waa in aad dhamaysato una qaadato sidii loogu talo galay. Hadii aad seeg-seegto oo aad kolba joojiso qaaxadu kaa tegimayso wayna adagtahay sida looga saara qofkaa marka dame.

HADII AAD ISLEEDAYAH WAAD QABTAA QAAXADA:

Hadii aad la xidhiidho dad qaba ood is leedahay waad la kulantay jesimka qaaxada waa in aad u tagtaa dhakhtar kaaga ood iska baadho cudurka qaaxada (TB)

HADII AAD U BAAHATID FAAHFAAHIN DHEER- AAD AH OO KU SAABSAN QAAXADA, FADLAN KA EEG INTERNET-KA:

The Centers for Disease control and
prevention:
www.cdc.gov

The US Department of Health and Human
Services:
www.omhrc.gov

• • •

Akhbaarta ku qoran dhambaalkan waxaa laga
soo xigtay qoraalo ay qoreen hay' adaha:

*The Centers for Disease control and Prevention
(CDC)*

*The US Department of Health and Human
Services*

*The Directors of Health Promotion and
Education (DHPE)*



**Waa maxay Qaaxadu
ama Feedhuhu?**
(Somali)



www.refugees.org
*Protecting Refugees, Serving Immigrants,
Upholding Freedom since 1911*

CONTACT INFORMATION:

riht@uscridc.org
**U.S. Committee for Refugees and
Immigrants**
1717 Massachusetts Ave., NW
Suite 200
Washington, DC 20036
Phone: 202 • 347 • 3507
Fax: 202 • 347 • 7177
www.refugees.org

*Soo-saaridda dhambaalkan waxaa caawiyey
Wasaaradda Caafimaadka iyo Horumarinta
bulshada, Xaafiska Dib=udejinta Qaxoontiga*

WAA MAXAY QAAXADU AMA FEEDHUHU?

Qaaxadu waa cudur aad u xun xoogna loo gala qaado oo jeemis (germs) kiisu ku gudbo hawada. Waana halis oo waa loo dhintaa hadaan layska daawayn.

SIDEE LOO KALA QAADAA QAAXADA?

Qaaxadu waxay ku fidaa marka qofka qaba cudurku uu qufoco, hidhiso, neefsado, qoslo ama candhuufo iyo xaako ku tufo dhulka. Jeermis (germs) kii cudurka ayaa hawada galaya halkaana waxaa ku sadhooba dadka. qofka u dhow ee qaata hawadii siday jeermisku (germs) wuxuu halis u yahay in uu markiiba qaado qaaxo.

YAA QAADA QAAXADA?

Ururka caafimaad ka aduunwaynaha (The World Health Organization 'WHO') ayaa wuxuu qiyaasay in ay qabaan cudurka qaxada ugu yaraan dad lagu qiyaasay lix bilyan oo qof. Marka la indha indheeyay caalamka oo dhan. Waxaa la sheegay in ay sanad walba udhintaan cudurkan dad lagu qiyaasay laba milyuun oo qof.

Qaaxadu waa cudur si fudud loo kala qaado waxayna khatar gelinaysaa dad badan oo u dhaw-dhaw qofka qaba. Sida dadka isku dugsiga ay yihiin, wada shaqeeyaan, iyo qoyska qofku la nool yahay.

MAXAY KU KALA DUWANYIHIIN QOFA UU JEERMISKII QAAXADU KU JIRO IYO QOFKA QAAXADU HAYSO?

Dadka sida bacteriyada (bacteria) cudurku ma bukaan cidna cudurka ma qaad siin karaan haseyeeshee, wax halis u yihiin in ay bakteriyadu isu bedesho qaaxo oo ay u soo dhacaan qaaxo.

Dadka qaba qaaxada (active TB) qaaxadii ayaa jidhkooda ku jirta oo ku tarmaysa. Qaxadu maka dambe waxay dilaysaa jidhka. Qaaxada si fudud ayaa look ala qaadaa. (TB)

Qaaxadu waa cudur si dhakhso badan loogu gudbinkaro asxaabtaada eheladaada, daka kula shaqeeya iyo kuwa wax kula dhigta.

QAAXADA AANAY DAAWADU KARIN

Hadii aanuu qofka qaaxada laga dawaynayaa aanuu daawada sidii loogu talo galay u qaadan ee kolba joojiyo cudurkii jidhka ku jiray wuxuu yeelanayaa awood uu daawada iskaga difaaco. Daawaduna waxba ka tarimayso marka dambe. Markaaa waxay dantu khasbaysa in qofka la siiyo daawo aad uga xoog badan tii hore mudo mudadii hore ka dheerna la siiyo. Dawadaas oo ka qaalisan tii lagu bilaabay markii hore.

SIDEE LOO DAWEYAA QAAXADA

Qaaxada waa laga bogsadaa laakiin waxay qaadataa mudo dheer. Mar-mar waxay qaadataa 6 ilaa 12 bilood inay daawadu kuu socoto. Ma aha in qofku joojiyo daawada marka uu dareemo in

